

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #1

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG/
FOODSAFETY

**OAR 333-150-0000,
CUTUBKA 3-301.11**

(A) Shaqaalaha cuntadu waa in ay gacmahooda u dhaqdaan sida ku cad §§ 2-301.12 iyo 2-301.13.

(B) Shaqaalaha cuntadu waa in ay yareeyaan ku taabashada cuntada gacmahooda oo banaana waana in ay isticmaalaan maacuun ku haboon sida tiishka deli, qaadooyin, fargeetooyin, galoofisyo halmar la isticmaalayo, ama qalabka qaybin-ta.^{P/PI}

SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Saddexda qodob ee lagama maarmaanka ah ee lagu faah-faahiyay Xeerka Cuntada FDA ee loogu tala galay yaraynta cudurada cuntada ka dhasha ee lagu gudbiyo marinada saxarada iyo afka waxaa kamid ah: ka reebidda/xanibidda shaqaalaha cuntada ee xanuunsan; gacma dhaqasho wanaagsan; iyo ayada oo aan gacmaha oo banaana lagu taabanayn cuntada u diyaarsan in la cuno. Mid kasta oo kamid ah qodobadaanu ma ahan mid ku filnaanaya marka gaarkiisa loo isticmaalo wuxuuna noqon karaa mid aan waxtar lahayn. Si kastaba ha ahaatee, marka dhammaan saddexda qodobba la isku daro si sax ahna looga faa'iidaysto, gudbinta jeermisyada lagu gudbiyo marinada saxarada iyo afka waa la xakamayn karaa. Oregon waxay shaqaalaha cuntada ka doonaysaa in ay yareeyaan ku taabashada gacmahooda oo banaana cuntada, laakiin mamnuuc ma ahan wakhti xaadirkaan. Laakiin waa muhiim in la ogaado in gacma dhaqashada wanaagsan ee la isticmaalayo saabuun iyo biyo nadiif ah, aysan ku filnaanayn kaligeed wax ka qabashada si looga hortago gudbinta jeermisyada ilma-aragtada ah ee lagu gudbinayo si toos ah ugu taabashada gacanta cuntada in la cuno u diyaarsan.

Yaraynta Ku taabashada Gacmaha oo Banaan

Shaqaalaha cuntadu waxay xanuunada ku faafin karaan deegaanka adeegga cuntada laga helo marka ay gacmahoodu taabtaan cuntada in la cuno u diyaarsan.

Cuntooyinka cunista u diyaarsan waa kuwa aan u baahnayn wax diyaarin ah oo dheeraad ah kahor inta aan la qaybin. Kuwaan waxaa kamid ah miraha iyo qudaarta cayriinka ah, ee la dhaqay, iyo cuntooyinka aan u baahnayn karin dheeraad ah sida saanwayjka, saladyada iyo rootiga. Shaqaalaha cuntadu waa in ay isticmaalaan maacuun marka ay la macaamilayaan cuntooyinka u diyaarsan in la cuno, halkii ay isticmaali lahaayeen gacmahooda oo banaana.

Maacuunta ku haboon waxaa kamid ah:

- Tiishka deli
- Fargeetooyinka
- Fargeetooyinka iyo qalabka kale ee cuntadalagu guro
- Qaadooyinka
- Galoofisyada halka mar la isticmaalo ee aan latex-ka ahayn

Waxyaabaha lagu daro ee sida gaarka ah loogu isticmaalo wax soosaarada cuntada kuwaas ugu danbayn si buuxda loo karinayo, sida pizza, looma tixgalinayo in yihiin kuwo u diyaarsan in la cuno waxaana lagu taaban karaa gacmaha oo banaana.

Galoofisyada iyo waxyaabaha difaaca ah badal uma noqonayaan gacma dhaqashada.

Markasta gacmaha dhaqo kahor inta aadan xiran galoofisyada iyo marka aad ku badalaysa mid cusub.

Waa in aad galoofisyada iska badashaa wakhtiyada soo socda:

- Isla markaaba marka ay ciidoobaan ama dilaacaan
- Kahor inta aadan shaqo kale bilaabin
- Kaddib marka aad gacanta ku qabato hilib ciiriin ah, kaluun, ama digaag iyo kahor inta aadan qaban cuntada u diyaarsan in la cuno



Galoofisyadu waa mid kamid ah khiyaarada BADAN ee looga hortagi karo ku taabashada gacmaha banaana cuntada diyaarka u ah cunista

Marna ha dhaqin oo dib ha u isticmaalin galoofisyada halka mar la isticmaalo.

Galoofisyada latex lama isticmaalayo, maadaama waxyaabaha xasaasiyadda keena ee galoofisyada ka imaanaya ay u gudbi karaan cuntada ayna sababi karaan falcelin xasaasiyadeed oo ku timaadda dadka qaar.